



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Febraayo 8, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Is xasuusinta Wax kala doorashada Qofka ee La xiriira Tallaalada COVID-19

Tallaalada COVID-19 waa qayb muhiim ah oo ka tirsan ilaalinta dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka, qoysaskooda iyo shaqaalahooda taageerada.

Nidaamka adeeg ee I/DD ee Oregon wuxuu ku dhisan yahay aaminsanaan asaasi ah oo ah in dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinku la siiyo awood ay ku gaaraan go'aanadooda gaarka ah si ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa. Tani macnaheedu waa in dadka qaba I/DD ay xaq u leeyihiin in ay gaaraan go'aan u gaar ah oo ku saabsan haddii ay tahay in ay qaataan tallaalka COVID-19.

Dadka qaba I/DD waxay go'aanka kala hadli karaan xubno ka tirsan qoyska, asxaab ama xirfadlayaal lagu kalsoon yahay (sida daryeel bixiyaha caafimaadka) oo loogu talagalay taageerada si go'aan loo gaaro. Waxaa sidoo kale lagu dhiirigelinayaa iyaga in aysan ka gaabsan in waydiiyaan su'aalo, codsadaan macluumaadka si kale loo dhigo, ama codsadaan macluumaadka in lagu bixiyo hab ay fahmayaan.

Daryeel bixiyayaasha iyo maamulayaasha kiisku waa in ay dadka ka caawiyaan gaarista go'aan laga warqabo oo ah hab dhexdhexaad ah oo aysan caqabad ku noqon go'aanka qofka ee la xiriira tallaalka. Haddii daryeel bixiye uu caqabad ku yahay xuquuqda go'aan gaaris ee qofka

qaba I/DD, taasi waxaa loo qaadan karaa in ay tahay xaalad xadgudub/dayacaad waana la baari doonaa taasi.

ODDS ayaa dejisay tilmaamo la raacayo oo dhowr ah si hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaashu dadka uga caawiyaan in ay gaaraan go'aano. Waxaa jirta [xaashida xaqiiqda ee tallaalka COVID-19](#) iyo sidoo kale [xaashida xaqiiqda ee xuquuqaha caafimaad](#) si loo caawiyo dadka.

Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) ayaa sidoo kale haysa tilmaamo la raacayo oo rajadu tahay in wax loo xaqiijiyo dadka qaba su'aalo ku saabsan badbaadada tallaalka COVID-19:

[Faa'iidooyinka tallaalka COVID-19](#)

[Guudmarka CDC ee fikradaha qaldan ee la qabo ee ku saabsan tallaalka COVID-19.](#)

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.